JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA

WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA

XAFIISKA MANAAHIJTA

# TAARIIKH

## FASALKA LABAAD



F. A.

# TAARIIKH

## FASALKA
## LABAAD EE DUGSIGA HOOSE

# 2

JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin
Ogolaansho

DAABACAADDII LABAAD

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
XAMAR, 1976

# TUSMADA

| | Bogga |
|---|---|
| Horumarkii Bulshada | 1 |
| Nabadgelyo | 2 |
| Guri Dhisad | 4 |
| Xaaska | 6 |
| Qabiilka | 8 |
| Q a r a n k a | 9 |
| Guryaha | 11 |
| Sidii Tulooyinku u samaysmeen | 13 |
| Magàalooyinka | 14 |
| Bulshanimo | 15 |
| Dhaqaalihii Dadkii hore | 17 |
| Bilaawgii wax kala iibsiga | 18 |
| Lacagta | 19 |
| Siyaasadda | 20 |
| Dabeecada iyo Dadka | 21 |
| Sida uu dadku Dabeecada uga Faa'iidasto | 23 |
| Qadhaabsi | 25 |
| Ugaarsi | 26 |
| Xoola Rabbaysi | 29 |
| Wax Beeridda | 31 |
| Gaadiidkii Biyaha | 33 |
| Gaadiidka Berriga | 35 |
| Degmooyinkii hore | 37 |

# HORDHAC

*Buuggan oo ah mid aanu ugu talagalnay fasalka labaad ee Dugsiyada Hoose wuxu noogu muuqdaa in uu yahay mid beddelaya habkii hore ee taariikhda loo dhigi jiray. Wasaanu buuggan ugu talagalay in ardayga ku jira fasalka labaad uu ogaado inaanay taariikhdu ahayn sheeko. Waxa buugga ka muuqda sidii dadku hore ugu maraayey waqtiba waqtiga ka dambeeya; wuxuu tusayaa inay taariikhdu tahay sheekadii horumarka baniaadmiga.*

*Waxaa waajib ku ah baraha maaddadan dhigaya inuu ardayda tuso horumarkaa taariikhda dunidu muujineyso. Haddii aynu eegno duruusta buugga ugu horreysa waxaynu arkaynaa sidii dadku hore ugu maray xagga bulshada. Waxaynu arkaynaa in dadku hore uga maray in uu kelidii noolaado ilaa uu qaranku saamaysmay. Waxaa duruustaa ku jira sidii nolosha qofku ay hore ugu martay ha ahaato xagga cuntada, xagga nabadgelyada ama xagga wax kala iibsiga. Duruustu way gaagaaban tahay. Sidaa aawadeed, waxaa habboon inuu macallinku sii faahfaahiyo duruustaa, laylisyada buugga ku jirana qaar kale ku kordhiyo.*

*Xafiiska Manaahijtu wuxuu u mahad naqayaa Qaalib Muusa Caafi iyo Xuseen Yusuf Ducaale oo buugga qoray, Cumar Saalim Axmed oo sawirrada u sameeyey iyo dadkii buugga garaacay.*

*Xafiisku waxa kale oo uu mahad weyn u celinayaa Madbacadda Qaranka oo suuragelisay in uu buuggani dhaqso u soo baxo.*

**Maamulka Xafiiska Manaahijta**
**Jaalle Bashiir Faarax Kaahiye**

# CASHARKA KOWAAD

*Horumarkii Bulshada*

Dadku sidan uu maanta ugu nool yahay bulshooyin, uma ay noolayn berigii hore. Waxaa jiray waqti uu qof waliba kelidii noolaa oo uu wax kasta isagu qabsan jiray. Qofkii kelidii noolaa noloshii way ku adkaatay, markaa wuxuu u baahday iuuu dadkale la noolaado si uu hawsha uga nosto. Waxyaalaha dadka isu keenay waxaa ka mid ah : Cunto raadsi, nabadgelyo, iyo guri dhisad. Deriskan waxaynu ku dhiganaynaa sidii cunto raadsigu dadka isugu keenay.

## CUNTO RAADSI

Dadka baahidiisu way badan tahay. Baahida ugu horaysa uu dadku leeyahay waa ta cuntada. Dadku haddii aanu cunto helin, way adag tahay siduu u noolaadaa, markaa waa inuu qofku cunto raadsadaa·

Qof kelidii nooli, ma heli jirin cunto fiican oo ku filan. Dadku si ay u noolaadaan, waxay qodan jireen xididdada dhirta, mirohoodana way guran jireen. Intaa waxaa dheeraa iyaga oo ugaarsan jiray.

Qofka kelidii ahi cunto badan ma soo heli jirin, marmarna waaba qadi jiray. Taasi waxay keentay in dadkii kooxkoox cunto u raadsadaan. Markii caynkaasu dhacday, shaqadii uu qofka kelidii ahi qaban jiray ayaa la wada qabsaday.

Dadkii qaar xididdadii ayey dooneen, qaarna ugaarsi ayey u baxeen. Cuntadii laysu keenay, way badatay, oo qof waliba cunto ku filan ayuu helay.

*Laylis :*

1) Muxuu qofka kelidii ahi cunto fiican u waayey ?
2) Sidee bay dadkii hore cuntadooda u heli jireen ?
3) Muxuu ahaa waxtarka laga helay dadka isu imaatinkiisa ?
4) Sheeg inta qof ee u sabab ahayd rootiga aad cunto samayntiisa ?

# CASHARKA LABAAD

*Nabadgelyo*



*Nin Libaax eryanayo*



*Saddex nin oo Libaax dilaya*

Marka qofku cuntadiisa helo, waxa labaad uu ku fakiri jiray waxay ahayd nabadgelyada naftiisa iyo ta wixii uu soo urursado. Adduunka waxaa jiray waxyaalo badan oo dadka



ka xoog roon. Kuwaa qaar waxay ahaayeen xayawaan, qaarna dhibaatooyin kale oo dunida iska jira.
Dhibaatooyinkaa waxaa ka mid ahaa, duufaanka, dhulka oo gariira iyo webiyada oo butaaca.

Qofku kelidii karti uu waxyaalahaa ka xoog roon iskaga celiyo ma lahayn; Sidaa aawadeed, qofku nabadgelyo ma haysan, had iyo goorna baqdin ayuu ku noolaa

Si dadku nabadgelyo u helaan, qof waliba dhawr qof oo kale ayuu la noolaaday si ay qof walba dhibaatadu uga yaraato. Dadku haddii ay wax wada qabsadaan nabadgelyo ayey helaan baqdintuna way yaraataa.

Nabadgelyadu waxay ahayd arrinkii labaad ee dadka isu keenay Dadku waxay u baahan yahiin inay is weheshadaan.

*Laylis :*

1) Maxay ku kala duwan yihiin noloshii dadkii hore iyo ta dadka maanta ?

2) Sheeg saddex xayawaan oo qofka kelidii ah ka xoog roon ?


3) Ka soo saar casharka eray la micna ah ammaan ?

4) Haddii aad kelidaa meel cidla ah ku nooshahay sidee baad u noolaan kari lahayd ?

5) Maxaa dhici kara haddii webiyadu butaacaan ?


## CASHARKA SADDEXAAD

### *Guri Dhisad*



*Gurigu wuxu u baahan yahay in la wada dhisaa.*

Sida dadku ugu baahan yahay cunto iyo nabadgelyo ayuu ugu baahan yahay hoy.



*Qof debed hurda oo mas ku soo socda.*

*Qof debed jooga oo roob ku da'ayo.*

Dadka hoygiisa waxa uu ka galaa wixi dhibaato u geysanaya sida roobka, qorraxda, dhaxanta, iyo bahalaha.



## CASHARKA SHANAAD

Guryaha dadku carruurtooda ayey ku korsadaan, alaabtoodana way ku ilaashadaan.

Dadku intii aanay si fiican u wada noolaan, guryo ma ay lahayn ee godad ayey ku noolaan jireen.

Guri samaystiisu way hawl badan tahay, kofka keliyina ma dhisi karo. Sidaa aawadeed, waxyaalihii dadka isu keenay waxaa ka mid ahaa iyada oo guri dhismihiisu dad qof ka badan loogu baahan yahay.

*Laylis :*

1) Hoygu muxuu taraa dadka ?
2) Guri dhismihiisu sidee buu ugu baahan yahay dad qof ka badan ?
3) Intaan guryaha la dhisan, xaggee bay dadku u hoyan jireen ?
4) Qofka aan hoy lahayni, muxuu dhibaato la kulmi karaa ?

## CASHARKA AFRAAD

### *Xaaska*

Waxa hore aynu u aragnay in dadku markii hore kelikeli u noolaayeen. Markii la arkay in dadku isu baahan yihiin, waxaa sameysmay xaasas. Xaasku waa dad ka badan ruux. Xaasku wuxuu ka kooban yahay nin, naag iyo carrurta ay dhalaan. Xaasku wuxuu u samaysmay si dadku isu weheshadaan oo u wada shaqeeyaan. Qof kasta oo xaaska ka mid ahi wuxuu xaaska u qabtaa shaqo gaar ah. Shaqoyinkaa wixii ka soo baxa waxaa leh xaaska oo dhan.



*Xaas qof waliba shaqo hayo.*



Ninka iyo naagta Soomaaliyeed mid waliba shaqo u gaar ah ayuu qabtaa. Ninka Soomaaliyeed markuu miyiga joogo, geeluu raacaa, guriguu oodaa, reerkuu u safraa oo wuu sahan tagaa. Ka magaaladana xaaskuu u shaqeeyaa, uu nolol fiican u raadiyaa. Naagtu gurigay dhistaa, adhigay listaa, carruurtay korisaa, cuntaday karisaa oo aqalka wanaagiisay ka shaqeeysaa.

Marka xaaska qof waliba hawshiisa ka soo baxo, waxaa samaysma xaas fiican. Marka la wada shaqeeyo, baahidii lagala kulmi jiray cuntada, nabadgelyada iyo guri dhisadka waa laga baxaa.

*Laylis :*

1) Weeraha hoos ku qoran iyamaa sax ah ?

b) Xaasku wuxuu ka kooban yahay nin iyo naag.

t. Carruur iyo naag.

j. Nin iyo naag iyo carruur.

2) Maxay ahaayeen sababaha uu xaasku u samaysmay?

3) Ka saar wixii aan sax ahayn :

b. Ninka Soomaaliyeed beertuu falaa, geeluu ilaaliyaa, xaaskuu u shaqeeyaa, adhiguu lisaa, dharkuu maydhaa.

t. Naagta Soomaaliyeed, cuntaday karisaa, carruurtay korisaa, gurigay nadiifisaa, cadowgay la dagaalantaa, biyahay dhaamisaa.

4) Ninka iyo naagta Soomaaliyeed iyamaa hawl qabad badan?

5) Goormaa xaaska fiicani samaysmaa?

6) Adigu maxaad u qabataa xaaskiina ?

Nolosha dadku hadba heer bay joogtay. Tallaabadii ku xigtay xaaska waxy ahayd qabiilka. Qabiilku wuxuu samaysmay markii xaas waliba isa sii dhaleen oo ay tarmeen. Horaantii qabiilku wuxuu u samaysmay waxtar iyo inuu dadku is kaashado. In kasta oo sidaasu jirtay, haddana berigii dambe, waxtarkii qabiilka waxaa ka batay dhibaatooyinkii uu la yimi ;

Markii xaas waliba qabiil noqday, waxaa dhacay in qabaa'ilkii iska hor yimaadeen. Taasi waxay keentay in qabiil qabiil la isu dilo oo laysu dhaco. Taa waxaa ka sii darraa iyado oo laysu kala eexday oo caddaalad la waayey.
Qabiilkii markaa dadkii wuu kala qaybiye oo kala fogeeyey, colaadina way ka dhalatay. Markii dhibaatooyinka qabiilka la arkay, dadkii way ka baxeen oo waxay noqdeen qaran isku mid ah oo isku dan ah.



*Laba qabiil oo degaalamaya.*

*Laylis :*

1) Muxuu horraantii qabiilku u abuurmay ?
2) Waxtarkii qabiilka maxaa markii dambe u beddelay waxyeello ?
3) Waa maxay caddaaladdu ?
4) Goormaa dadka Soomaaliyeed qabiilkii aaseen ?



## CASHARKA LIXAAD

### *Qaranka*

Qaranku wuxuu ka koobma dad badan oo meel wada deggan oo isku dan ah. Dadka qaranku ka koobmaa markii hore waxay ahaayeen qabiilooyin, qabiil waliba meel degi jiray. Markii qabaa'ilkii bateen, ee dhibaatooyinkii ay la yimaadeen la ogaaday, ayaa qarannimadu dhalatay. Halkii qof waliba daacad u ahaa qabiilkiisa, ayuu dadkii uu meel la degganaa oo dhan uu wax la qabsaday. Qof waliba markuu sidaa yeelay, qabiikii wuu baaba'ay oo meeshiisii waxaa galay qaran. Dadkii isku degmo ama isku wadan ahaa waxay noqdeen qaran oo way wada shaqeeyeen.

Qaranku waa bulsho isku tolan, waxaana lagu gartaa calan ka dhexeeya oo qof kastaa daacad u yahay uu ku dhaato. Qaran waliba wuxuu leeyahay ciidan calanka iyo dalka qaranka ilaaliya. Qaran waliba wuxuu leeyahay dawlad iyo madax u talisa. Qarannimadu waxay la wareegtay xilkii qabiilku qofka u hayay. Qarannimada runta ah marka la gaaro, qofku qaranka wuxuu ka helaa cunto, nabadgelyo iyo hoy. Taasi waxay suura gashaa marka qof waliba xilkiisa ka soo baxo.



*Arday Calanka qaranka Salaamaya.*

*Laylis :*

1) Waa maxay qaranku ?
2) Qaranku sidee buu uga waxtar badan yahay qabiilka ?

3) Kala sheeg weeraha hoos ku qoran, kuwa sax ah iyo kuwa kale.

b. Qaranku waa dad badan oo isku dal iyo danba ah;

t. Qaran waliba wuxuu leeyahay calan.

j. Qaran waa qabiilooyin marka ay doonaan dagaalama.

4) Sheeg waxyaalaha uu qaranku kala wareegay qabiilka uu qofka u qabto.

5) Sheeg sida qofka kabaha sameeya, ka dharka iibiya, iyo ka cuntada gadaa isugu shaqeeyaan.




## CASHARKA TODDOBAAD

### *Guryaha*



*Shimbir buulkeedii Carruur ku haysata*



*Doofaar God Qodanaya*

Nafleyda adduunka ku nool badankoodu, waxay leeyihiin hoy ay ku noolaadaan. Shimbiruhu waxay leeyihiin buul ay ka galaan roobkan dhaxanta iyo qorraxda. Shimbiruhu buulkooda carruurtooday ku korsadaan.

Cayayaanka qudhiisu waxay leeyihiin godad. Cayayaanka waxaa ka mid ah shinnida. Shinnidu waxay gashaa godad ay ku samaysato malab ay cunto waqtiga jiilaalka.

Sida xayawaanka, shimbiraha iyo cayayaanka ayay dadkuna ugu baahan yihiin hoy ama guri. Hoyga dadku marba heer ayuu joogay. Bilowgii, dadka waxaa hoy u ahaa godadka.

Markii dadku isu yimaadeen ee ay is weheshadeen, waxay samaysteen guryo. Guryahaasi markii hore waxay ka sameeyeen geedo, caleemo iyo laamaha dhirta. Markii xiktay waxay dhisteen mundulayaal iyo carshaan ilaa markii dambe ay gaareen heer ay saro ama daaraha aynu magaalooyinka ku aragno samaysteen

Casharradii hore waxaynu ku soo aragnay in hoygu faa'iidooyin badan dadka u leeyahay.

Dadka hoygiisu muxuu uga baahan yahay ?
Hoygu wuxuu u baahan yahay dhaqaale iyo nadaafad si dadka ku jira noloshoodu u wanaagsanaato oo ay cudurrada uga nabad galaan.

*Laylis :*

1) Sheeg afar wax oo dadka dhibaato u geysan kara haddii aanay hoy lahayn.
2) Sidee baa dadku guryohooda u sii hagaajin karaan?
3) Maxaa dhici kara haddii dadku guryohooda nadiifin waayaan ?
4) Maxaad ka qabataa gurigiina si uu u fiicnaado ?
5) Maxay ku kala duwan yihiin hoyga dadka iyo kan xayawaanku ?



## CASHARKA SIDDEEDAAD

### *Sidii Tuulooyinku u Samaysmeen*

Tuuladu waa magaalo yar oo guryaha ka dhisani ay u badan yihiin carshaan iyo mundulayaal. Dadku markay beeraley noqdeen waxay dhisteen guryo ka samaysan dhoobo iyo qoryo.

Markii guryahaasi bateen waxaa abuurmay tuulooyin. Dadka tuulooyinka ku nooli waxay qabtaan shaqooyin kala duwan. Dadka qaar waxay iibiyaan dukaano, qaar waxay leeyihiin maqaayado iyo meelo wax laga cuno, qaar baabuurada ayay kireeyaan, kuwa kalena shaqooyin kale ayey hayaan.

Tuuladu waa bilowgii magaalada. Tuulooyinka dalkeenna badanaaba, dadka maalintii jooga iyo kuwa habeenkii u soo hoydaa isma le'eka oo waxaa badan dadka maalintii jooga

Dadka maalintii joogaa waxay u badan yihiin qaar miyiga iyo beeraha ka yimi, oo galabtiina ka caraaba.
Dadka tuulada u soo hoydaa waa kuwa deggan iyo xaasaskooda.

*Laylis :*

1) Calaamad ku samee jawaabta saxa ah :
Dadka waxaa ugu hor deggay :
b. Ugaarsatada ;
j. Kuwii xoolaha rabbeystay ;
t. Beeraleyda :
2) Aqalada tuulooyinka waxa ugu badan
b. daaro (saro) ;
t. Aqal Soomaali
j. Carshaan iyo mundulayaal
3. Sidee baa dadka tuulooyinka maalintii joogaa uga badan yihiin kuwa u soo hoyda ?
4) Dadka tuulooyinka deggani maxay qabtaan ?

# CASHARKA SAGAALAAD

## *Magaalooyinka*

Tuulooyinku markii ay waaweynaadeen oo dadkii ku batay waxay isu beddeleen magaalooyin. Magaalooyinka waxaa deggan dad markii hore kala dan ahaa. Dadkaasi markii ay kala guursadeen ayey isku qaldameen. Qarannimadu waxay ka bilaabantay magaalooyinka markii dadkii isku bateen ee ay is kala garan waayeen. Tuulooyinka markii hore waxaa dadka ka dhexeeyey qabiil, magaaladase shaqo, wax kala iibsi iyo wax wada qabsi.

Waxaynu hore u ogaanay in dadka tuulooyinka joogaa ay shaqooyinka kala duwan qabtaan shaqooyinka magaalooyinka way ka badan yihiin kuwa tuulada, waana ka sii kala duwan yihiin.

Magaalooyinka guryaha ka dhisani way ka badan yihiin kuwa tuulada, waana ka qurux badan yihiin.

Sida magaalooyinku tuulooyinka uga waaweyn yihiin, ayey magaalooyinkuna u kala waaweyn yihiin. Haddii aad eegtid magaalooyinkeenna, waxaad arkaysaa in Muqdisho ugu weyn tahay, Hargeysina ku xigto. Magaalooyinka kale sidaas ayey iyana u sii kala waaweyn yihiin.

Tuulooyinka iyo magaalooyinku way isku xiran yihiin. ᶦagaalo kasta waxaa la xiriira tuulooyin. Haddii aad u ·satid waxaad arkaysaa in magaalooyinka Muqdisho, ıargeysa, Boosaaso, Baydhaba, iyo Kismaayo mid walba ay xiriiraan tuulooy:n xagga dhaqaalaha.

*ılis :*

1) Waxaad sheegtaa lix magaalo oo dalkeenna ku yaal.
2) Maxay magaaladu tuulada kaga duwan tahay ?
3) Sheeg sida qarannimadu magaalooyinka uga bilaabantay ?
4) Maxay ku kala duwan yihiin shaqooyinka magaalada iyo kuwa tuuladu ?
5) Sheeg shaqo magaalada jirta oo aan tuulada jirin ?
6) Sheeg saddex magaalo oo ku yaala dalkeenna iyo laba tuulo oo mid walba la xiriira.



# CASHARKA TOBNAAD

## *Bulshanimo*

Bulsho waa dad meel wada jooga oo isku dhaqan iyo hiddo ah. Bulshada ujeeddadeedu waa isku mid. Si ay bulshadu danteeda u qaadho qof waliba waa inuu ka soo baxaa hawshiisa.

Bulshadu waxay ka bilaabantay xaaska, waxaana ku xigay qabiilka, dabadeedna qaranka. Xaasku waa bulsho yar oo kooban, qarankuna waa mid weyn oo balaaran.

Bulsho waliba waxay leedahay xeer qof walba laga rabo inuu raaco. Xaaska, qabiilka iyo qarankuba arrinkaa way ka sinaayeen. Xeerku haddii aanu jirin, qof waliba wixii uu doono ayuu ku kici lahaa. Xeerku dadka wuu kala ilaaliyaa wuuna kala wadaa.

Bulsho waliba xeerka ka sokow, waxaa ay leedahay waxyaalo isu soo dhoweeya dadka sida guurka, ciyaaraha, riwaayadaha iyo waxyaalaha kale ay dadku isku maaweeliyaan.

Dakii hore, marka ay waqti helaan, habeenkii bay dabkahareerahaka fariisanjireen oo qof waliba wixii uu maalintii soo arkay ka sheekayn jiray. Marka beeruhu u go'aan ama dhulku barwaaqo, noqdo way ciyaari jireen. Haddii dhibaato ku dhacdo. Ilaahyadooda ayey ka ducaysan jireen si ay dhibaatada uga qaadaan.

Inkasto oo dadka waqtigani intaaba sameeyo, haddana habka maanta iyo habkii hore way kala duwan yihiin.

*Laylis :*

1) Goormay bulshanimadu bilaabantay.

2) Meesha aad joogtid, haddii aan xeer jirin, maxaa dhici lahaa ?

3) Xeerku muxuu u taraa bulshada ?

4) Xaas waliba xeer isaga u gooni ah ayuu leeyahay. maxaa ka mid ah xeerka xaaskiinu ku dhaqmo ?

5) Waxaanu sheegnay inaan bulshadu ka maarmin madaddalo iyo maaweelo. Maxaa dadku ku maddadaashaan magaalada ama tuulada aad joogtid ?

6) Bulshadu waa dad meel wada deggan oo isku dan ah. Waa maxay danta bulshada Soomaaliyeed isku xidhaa ?



## CASHARKA KOW IYO TOBNAAD

### *Dhaqaalihii Dadkii Hore*

Sida maanta loogu baahan yahay dhaqaale, ayaa dadkii horena ugu baahnaa ? Dadkii hore waxba ma dhaqan jirin ee sidii aynu hore u aragnay, qofku wuu ugaarsan jiray, qadhaabna wuu ku noolaa. Wixii maalin la soo helo, maalintaaba waa la cuni jiray oo waxba berrito looma dhigan jirin.

Waqtigaa markii ku xigay, dadku xoolo ayuu rabbeystay. Dhaqaalihii dadku markaa wuxuu ku xirmay xoolaha oo laga heli jiray caano, cad, subag iyo hargo. Xoolaha ka sokow, dadku wax bay beerteen oo dadka qaar dhaqaalahoodii wuxuu ku dhismay beeraha.

Markii dadku xoolo dhaqdeen oo ay beero yeesheen, waxay ka raysteen inay maalin walba cunto debedda u doontaan.

Sidaasi waxay ku suura gashay iyada oo dadkii barteen in waxa ay xoolahooda iyo beerohooda ka helaan waxna ka cunaan, waxna ka dhigtaan. Dadkii markaa ka bacdi, waxay heleen waqti ay nastaan iyo waqti ay ka shaqeeyaan dhaqaalaha guryahooda,

*Laylis :*

1) Maxay dadkii hore dhaqaale u lahaan waayeen ?

2) Muxuu ku dhisan yahay dhaqaalaha dadka xoolaha leh iyo kan beeraleydu ?

3) Markii dadku ay xoolo dhaqdeen oo ay beero yeesheen, waxay heleen waqti ay nastaan. Waqtigaas maxay dadku qabsan jireen ?

4) Adigu maxaad qabataa waqtiga aanad shaqada lahayn ?

## CASHARKA LABA IYO TOBNAAD

*Bilowgii Wax Kala Iibsiga*

Sidii aynu casharradii hore ugu soo dhigannay, dadku horraantii waxba ma kala iibsan jirin. Qof waliba wixii uu soo helo isaga uun baa cuni jiray.

Markii dadku ay xoolo rabbaysteen oo ay wax beer-teen, waxay arkeen in wixii ay ka helayeen xoolaha iyo beeraha ay wax uga soo hareen. Dadkii xoolaha lahaa waxaa u soo haray wixii xoolaha ka yimi, kuwii beeraha lahaana wixii beeraha ka soo baxay. Dadkii waxay markaa ku fakireen inay waxyaalahaa soo haray ay ku beddeshaan waxyaalaha kale oo ay u baahan yihiin

Maanta qofka xoolaha lihi intuu caano, subag ama neef xoola ah soo kaxeeyo oo magaalada keeno ayuu lacag ku beddeshaa. Lacagtaa dukaan ayuu la tagaa uu ku iibsadaa sonkor, dhar, soor iyo wixii kale uu u baahdo. Haddaba berigii hore lacagi ma jirin. Qofka xoolaha lihi haddii uu u baahdo kintaal soor ah, neef xoola ah intuu kaxeeyo ayuu doon dooni jiray qof kintaal soor ah haysta oo u baahan neef xoola ah. Marka uu qofkaa helo, ayuu neefkii ku beddelan jiray kintaal soor ah. Qofku wixii uu haysto ayuu ku beddelan jiray wixii aanu haysan uu u baahan yahay.

*Laylis :*

1) Maxay dadkii hore wax u kala iibsan waayeen ?
2) Wax kala iibsigu sidee buu u bilaabmay ?
3) Haddii aanay lacagi jirin, oo aad haysatid shaarar badan oo aad u baahan tahay kabo, sidee baad kabo u heli kari lahayd ?
4) Maxay in lacag wax lagu kala iibsadaa uga hawl yar tahay in alaabo laysku doorsado ?



## CASHARKA SADDEX IYO TOBNAAD

*L a c a g t a*

Haddii neef ari ah lagu beddelo kintaal soor ah, waxaynu arki karraa in labadaa wax ee laysku beddelay ay kala ganac badan yihiin. Waxaa laga yaabaa in kintaalka soorta ahi yahay 80 Shilin, neefka ariga ahina 100 shilin. La badii wax ee laysku beddelay waxay is dheer yihiin 20 shilin. Waxaa laysku beddeli karaa laba wax oo isku sicir ah.

Lacagtu waxay ku timi markii la arkay in wixii la is dhaafsanayey ama la isku doorsanayey aanay isku ganac ahayn. Waxaa markaa loo baahday wax mideeya wax kala iibsiga oo qiimeheeda laysla yaqaan. Lacagtu qiime laysla yaqaan bay leedahay. Haddii aad shilin haysatid, wixii aad ku iibsan kartid waad saran kartaa. Lacagtu waxay fududaysay wax kala iibsigii, dadkana dhibaatooyin badan bay ka furatay.

Maanta waddankeenna waxa taalla alaab badan oo ka timaadda waddanna kale. Alaabtaasi ma aha mid alaab waddankeenna laga qaaday lagu soo beddelay. Innagu alaab iyo xoolo ayaynu debedda u diraa oo lacag laynaga siistaa, markaasaynu lacagtaa alaab kale ku soo beddelanaa. Adduun weynaha wax kala iibsigiisu wuxuu ku xiran yahay lacagta. Haddii aan lacagi jirin, alaabta dunida kale aynu ka soo iibsanno lama heleen.

*Laylis :*

1) Haddii aad beer leedahay oo aad kintaal soor ah magaalada keentid, sidee baad u iibsan kari lahayd dhar aad u baahan tahay ?
2) Magaalada ama tuulada aad joogtid, iyamaa qiima badan neef ari ah iyo kintaal soor ah ? Maanta labadaa ma laysku beddelan karaa ? Waayo ?
3) Sidee bay lacagtu u fududaysay wax kala iibsiga ?
4) Sidee baynu waddannada kale wax uga soo iibsannaa ?

## CASHARKA AFAR IYO TOBNAAD

### *Siyaasadda*

Siyaasaddu waa cilmiga dawladnimada iyo sida laysu xukumo. Markii dadku kelikeli noolaa, siyaasad, dawladnimo iyo xeer midna ma jirin oo looma baahnayn. Qaanuunka ama xeerka qura ee jiray wuxuu ahaa ka naflayda duurka ku nool ka dhexeeya. Kaasi wuxuu ahaa mid fasaxaya in mid walba kii uu ka xoog roon yahay cuno. Dadku isma cuni jirin, laakin qof waliba qofka ka itaal yar ayuu dhici jiray, ama wixii uu haysto ka qaadi jirey.

Wax dawlad u eg, waxaa ugu horeeyay xaaska oo aabbuhu u madax ahaa. qof kasta oo xaaska ka mid ihi wuxuu ilaalin jiray xeerka xaaska u yaal. Qofkii xeerka jebiya waa la ciqaabi jiray. Markii dadku batay xukunku dhawr heer buu soo maray. Waxaa jiray waqti dadka uu xukumi jiray qofka ugu xoog weyni, marna odayaal, marna boqoro. Muddo ka bacdi, dadkii waxay neceen xukunkii boqorrada oo aad u xumaaday. Waxa markaa dhacay in dadkii dooneen inay iyagu doortaan cidii xukumi lahayd. Maanta inkasta oo ay boqoro jiraan haddana dadka badankoodu way doortaan madaxdooda. Dadku madaxdooda waxay dooran karaan marka ay cilmi iyo aqoon u yeeshaan sida fiican ee wax loo doorto.

*Laylis :*

1. Waa maxay xeerka naflayda duurka ku nool ka dhexeeyaa ?
2. Sheeg in weeraha hoos ku qorani ay sax yihiin iyo in kale ?
   - b. Xeerka iyo is xukunku waxay bilaabmeen markii xaasku abuurmay.
   - t Dadka markii ugu horaysay waxaa xukumi jiray boqoro.
   - j. Dad wax xukuma waxaa ugu wanaagsanaa boqoradaa
   - x. Dadku waxay ciddii xukumaysa dooran karaan markay yeeshaan cilmi iyo aqoon ku filan.
3. Dalkeena sidee baa wax loo dooran jiray waqtigii ka horeeyay kacaanka ?



## CASHARKA SHAN IYO TOBNAAD

### *Dabeecada iyo dadka*

Dabeecaddu waxa weeye waxa dadka iyo wixii kale ee adduunka ku noolba noloshoodu ku xiran tahay. Waxyaalahaa waxaa ka mid ah roobka, buuraha, qabowga iyo kulka, dhirta iyo wixii kale ee dadka noloshiisa beddeli kara oo dhan. Dadka noloshiisu, had iyo jeer waxay ku xiran tahay meesha ay joogaan sida ay tahay. Dadku dhulka ay degaan isku wada mid ma aha ee meel waliba dabeecad gooniya ayay leedahay.
Dhulka meeli way kulushahay, meeli waa qabow, meeli way roob badan tahay, meel meelna roobba kama da'o.

Dalka Soomaalida haddii aynu eegno, waxaynu ognahay inaanu isku wada mid ahayn, dadku wixii ay qabtaana kala gedisan yihiin.
Waxaynu naqaan in dalka geedaha leh, xoolaha lagu dhaqo, ay dadka meelahaa degaa reer guuraa u badan yihiin.
Meesha webiyada leh waxbaa lagu beertaa, xeebahana waa laga kalluumaystaa. Dabeecadda dhulku waxay sabab u tahay in dadka meelaha kala duwan ku nool, noloshooda, cuntadooda iyo dharkooduba kala duwan yihiin.
Sidaa aawadeed, haddii dhulka dabeecaddiisu is beddesho, dadka dhaqankiisu wuu is beddelaa.

*Laylis :*

1. Waa maxay dabeecaddu ?
2. Dhulkeena xeebuhu waa kulayl, roobkuna waa ku yar yahay. maxaad ka sheegi kartaa dadka xeebaha ku nool noloshooda ?
3.) Hadallada hoos ku qorani ma run baa mise waa been:
   - b. Meesha cawska badan beeraa laga fashaa.
   - t. Dhulka qabow laguma noolaan karo.
   - j. Dabeecadda dhulku waa isku wada mid.

x. Dhulka dabeecaddiisu haddii ay is beddesho dadkuna noloshiisa wuu beddelaa.

4) Haddii lagu geeyo meel jasiirad ah oo kulul, oo dhan walba biyo kaga wareegsan yihiin, sidee baad u noolaan lahayd ?

5. Halka aad deggan tahay, dabeecadda dhulku waa caynkee ?
Dadku muxuu cunaa, muxuu huwadaa, xoolaha ay dhaqdaan maxay ka kooban yihiin ?



## CASHARKA LIX IYO TOBNAAD

*Sida uu Dadku Dabeecadda uga Faa'iidaysto*

Sida aynu casharka hore ku aragnay, dabeecadda dhulka iyo nolosha dadku way isku xiran yihiin. Dadku weligiiba wuxuu ku kala noolaa dhul dabeecaddiisu kala geddisan tahay. Haddii aynu u noqono taariikhdii dadkii hore, waxa aynu kale oo ognahay in dadku aanay lahayn aqalo fiican, hu, xoolo iyo beero midna. Waxa kale oo aynu ognahay, in markii dambe dadkii noloshoodii hagaajiyeen oo koox waliba dabeecaddii ku xeeraayd la dagaalameen si ay ugu nooloon karto. Dadkii dhulka xooluhu ku badnaayeen degganaa xoolihii bay rabbaysteen, kuwii webiyada joogeyna wax bay beerteen. Xagga huga, dadkii meesha qabow joogay waxay dhaxantii iskaga celiyeen hargo markii dambena dhar culus oo ay ka samaysteen dhogorta xoolaha. Kuwii meesha kulul degganaa, markii hore dharba uma baahan, markii dambena waxay samaysteen hu fudud oo aan culaysin. Taa waxaa inna tusaya inaan huga dadka Yurub deggan iyo kuwa Afrika joogaa isku mid ahayn. Xagga hoyga, dadka dhulka qabow joogaa, waxay dhistaan guryo ka samaysan dhagax oo qabowga ka celiya, kuwa meesha kulul joogaana, guryo ka samaysan geedo iyo loox sida kuwa dadka Afrika ku nooli dhistaan.



*Xaas meel qabow jooga oo dhar culculus sita.*



*Dad meel kulu jooga oo dhar fudud sita.*

Dadku meel kasta ha ku noolaadee, noloshiisu waxay ku xidhan tahay meesha uu ku nool yahay degaankeeda Meesha roobku ku yar yahay, dadku intay dhulka qotaan ayey ceelal ka samaysan karaan oo biyo **kala** soo bixi karaan. Dhulka kulul waa la qaboojin karaa, ka qabowna waa la kulaylin karaa markaa waxaynu oran karraa dadku degaanka wuu beddeli karaa.

*Laylis :*

1) Weeraha hoos ku qoran hagaaji.
   b. Dadka dhulka kulul ku nooli waxay u baahan yihiin aqalo dhagax ah iyo dhar culus.
   t. Dhulka roobka badani xoolaha nool uma fiicna.
   j. Dadku dabeecadda dhulka ma baddeli karo.
   x. Dabeecadda dhulka iyo nolosha dadku iskuma xirna.
2) Waxaad sheegtaa sida ay huga iyo dabeecadda dhulku isugu xiran yihiin.
3) Maxay ku kala duwan yihiin dabeecadda Yurub iyo Afrika xagga guryaha ? Maxaa u sabab ah ?.



# CASHARKA TODDOBA IYO TOBNAAD

## *Q a d h a a b s i*

Arrinka qaraabsi ugu horreeyey ee dadka iyo dabeecadda iska hor keenay wuxuu ahaa cuntada uu dadku u baahnaa. Dadku waagii hore ma ay lahayn xoolo, beero iyo hanti kale midna. Waxay ku noolaayeen qadhaab oo ka koobnaa xididdo, miro iyo wixii kale ee dhulka ka soo bixi jirey Dadku sida daayeerku maanta cuntadiisa u helo ayey iyaguna u heli jireen. Inta ay maalintii oo dhan socdaan ayey ururin jireen wixii ay dhulka ka helaan ee ay cuni karaan Marka ay maalintii sidaa qadhaab ugu baxaan ayay habeenkii godadkii ay seexan jireen ku soo noqon jireen. Halkaa waxaynu ka arkaynaa in dadka noloshiisu ku xirnayd dhulka iyo sida abuurkiisu yahay. Dadku markaa, dabeecadda wuu ka faa'iidaysan jiray. Qadhaabsigu isaga oo ahaa heerkii ugu horreeyey uu dadku cuntadiisa ku heli jiray, ayaa haddana dhibaatooyin lagala kulmi jiray. Dadku horraantii ma ay aqoon dhirta kuwa sunta ah iyo kuwa kale, sidaa aawadeed dad badan baa ku dhiman jiray miro iyo xididdo ay u haysteen cunto fiican. Dhibaatada labaad waxay ahayd iyada oo qadhaabsigu sidiisa u hawl badnaa. Waxa dhici jiray in dhulku marmar abaar noqon jiray oo aan qadhaab la heli jirin oo markaa dadka gaajo layn jirtay Qadhaabsigu sidaa aawadeed ma uu ahayn wax la isku halayn karo.

*Laylis :*

1) Waa maxay qadhaabku ? waxaad sheegtaa afar wax oo la cuno oo qadhaab ah.
2) Sidee bay noloshii dadkii hore iyo ta daayeerku isugu mid ahaayeen ?
3) Sheeg sida cuntada dadku ugu xirnayd dhulka abuurkiisa.
4) Waxaad sheegtaa laba dhibaato oo dadku kala kulmi jireen qadhaabsiga.
5) Waxaad sheegtaa waxa aan qadhaabsigu u ahayn wax la isku halayn karo ?.

## CASHARKA SIDDEED IYO TOBNAAD

### *Ugaarsi*

Sida qadhaabka, waxyaalaha dabeecadda dhulka weligood ku jiray waxa ka mid ahaa ugaarta. Dadku markay arkeen inaan qadhaabsiga keliya laysku halayn karin, waxay ku fakireen inay ugaarsadaan. Berigii hore lama aqoon hubka lagu ugaarsado. Hubka la'aantiina way adkayd sida ugaarta iyo shimbiraha loo dilo oo cunto looga dhigto. Ugaarsiga markii laga fakiray, waxa lagu tala galay qalab lagu ugaarsado.

Berigaa aynu ka hadlayno, birta iyo macdanta kale midna lama aqoon, waxaase jirtay in dadku ogaaday in dhagaxa laga faa'iidaysan karo. Dhagaxii inta la qoray ayaa laga sameeyey warmo, iyo mindiyo, markaasaa lagu ugaarsaday. waxa kale oo lagu ugaarsan jiray burar iyo ulo laga goosan jiray dhirta.


Dadku maalin walba ugaarsi ayey u bixi jireen, laakiin goor walba wax lama soo heli jirin oo marmar ayaa la qadi jiray. Berigii hore ugaarsiga dhibaatooyin badan baa lagala kulmi jiray, hase yeeshee, dadkii waxay barteen inay ugaarta dabinno u sameeyaan oo ku qabtaan. Sidaasi way ka hawl yarayd in qofku ugaarta dabo ordo oo uu damco inuu orod ku qabto ama dhagax iyo bur ku dilo. Dhibaatooyinka ugaarsiga waxa ka mid ahaa iyadoo dadku hawl badan kala kulmi jireen iyaga oo aan hubin inay wax soo heli doonaan. Waxa kale oo jiray inaan dadku ahayn nafleyda qura ee ugaarsata. Waxa dadka la ugaarsan jiray xayawaan kale oo iyaga ka waaweyn. Waxa dhici jirtay in qofkii oo is leh wax soo ugaarso isagii bahalaha ka waaweyni ugaarsan jireen.

Bani'aadmigu heerkaa ugaarsiga wuxuu ku noolaa muddo badan. In kasta oo ay maanta jiraan dad noloshoodu ugaarsi ku dhisan tahay, haddana aadmigu heerkaa hore ayuu uga maray oo wuxuu gaaray nolol ka fiican oo ka hawl yar.





*Nin ugaarsanaya oo isna la ugaarsanayo*



*Niman ugaarsi ka soo noqdey oo xaaskoodii sugayaan*

*Laylis :*

1) Weeraha hoos ku qorani ma run baa mise waa been?

B. Markii hubka la samaystay, waxa lagu fakiray in la ugaarsado.

T. Dadku way ugaarsan jireen iyagana waa la ugaarsan jiray.

J. Maanta dadkii markuu hore u maray, ma jiraan dad cuntadoodu ku xiran tahay ugaarsi.

X. Dadku haddii ay ugaarsi u baxaan kolleyba sooma qadi jirin.

2) Ugaarta aad taqaan waxaad ka sheegtaa afar ?

3) Sheeg laba dhibaato oo lagala kulmi jiray ugaarsiga ?

4) Haddii aad joogtid meel duur ah oo ugaar badan oo aan adiga mooyee cid kale joogin, sidee baad u ugaarsan lahayd ? Sidee baad isaga celin lahayd bahalaha kaa waaweyn ee ku ugaarsan kara ?



## CASHARKA SAGAAL IYO TOBNAAD

### *Xoola Rabbaysi*

Xoolaha maanta uu dadku dhaqdaa, berigii hore ma ay rabbaysnayn waxayna ku jireen ugaadha. Sidii xoolaha rabbayskoodii u bilaabmay si fiican loo garan maayo, laakiin waa la malayn karaa. Waxa loo malaynayaa, in sidii ay dadku u ugaarsanayeen, ay heleen ugaar yaryar oo ay geeyeen godadkoodii. Waxay arkeen in ugaadhii yaryarayd oo ay ku jireen waxaro, naylo, weylo, iyo nirigo, ay dadka la noolaan karaan oo aanay ka cararayn marka ay u bartaan. Markii sidaasi muuqatay, waxa la bilaabay in xayawaankii yar ee la soo heloba la rabbeeyo. Xayawaankii qaar ay ka mid yihiin xooluhu, eydu, iyo bisaddu way rebbaysmeen, qaarna rabbaayaddoodii way adkaatay.

Rabbaayadii xoolaha markay hagaagtay, dadki waxay ka nasteen hawshii ugaarsiga oo xoolahoodii ayey ka heleen wixii ay cunto u baahnaayeenba. In kasta oo taasi jirtay haddana xoolaha qudhooda, sida loo dhiqi jiray ma hawl yarayn. Xooluhu waxay u baahnaayeen in marba la geeyo meesha doogga iyo biyaha leh si ay u tarmaan oo noloshoodu u fiicnaato. Xoolahaa marba meel loola guurayey, waxay lagama maarmaan ka dhigeen in dadku godadkii ka baxaan oo ay samaystaan guryo fudud oo ay marba meel ula guuraan.

Guryahaasi waxay ka samaysnaayeen saamaha iyo hargaha xoolaha, caws iyo xarko sida kuwa reer baadiyaha dalkeenna.



*Reer guuraa xoolohoodii wata oo guryohoodii hor jooga.*

*Laylis :*

1) Maxaad u malaynaysaa ugaartii dadku ugu hor rabbaystay inay ahayd ? Waayo ?
2) Maxay kala yihiin waxaraha iyo nayluhu ?
3) Maxaa ka mid ahaa xayawaankii rabayadoodii adkaatey ?
4) Dadkii hore gurvohooda waxay ka samaysan jireen saamo, hargo, caws, iyo qoryo. Sawir guri intaa ka samaysan ?
5) Xooloha rabbaayaddooda iyo guryaha lala guuro iyamaa dadku hor bartay ?
6) Xoolaha dhaqashadoodii maxaa dhibato lagala kulmay ?.



## CASHARKA LABAATANAAD

### *Waxbeeridda*

Dadkii sidii ay xoolahoodii u raacanayeen, ayey qaar ka mid ahaa arkeen oo u fiirsadeen siday dhirtu u baxdo. Waxay ogaadeen in haddii iniin dhulka lagu rido uu geed soo bixi karo. Waxay kale oo arkeen in dhirta mirohooda qaar inta la kariyo la cuni karo.

Deriskii hore waxaynu ku aragnay in aanay xoolaha dhaqashadoodu hawl yarayn. Dadkii xoola dhaqatada ahaa qaarkood waxay door bideen inay wax beertaan oo meel iska degaan. Dadkaasi inta ay meel biyo iyo ciid fiican leh degeen ayey dhulkii qodeen oo iniiyihii ku rideen. Markii hore dadku waxay dhulka ku qodi jireen ulo iyo qoryo. Markii waqtigaa xigtay ee dhulkii la beerayey batay waxa la sameeyey yaambooyin markii hore ka samaysnaa qori xagga hore dhagax lagaga xiray markii birta la bartayna bir. Waxa heerkaa xiggay markii dibiyadda xooggooda inta laga faa'iidaystay beerihii lagu qotay.

Dadku markii ay beeraha samaysteen, way degeen markaa waxay heleen waqti ay nastaan. Waxay dhisteen guryo ay ka sameeyeen dhoobo iyo qoryo, kuwaasoo loogu tala galay inaan lala guurin. Dadkii beeraha samaystay waxay ka raysteen inay marba meel u guuraan noloshoodiina tii xoola dhaqatada aad bay uga fiicnaatay.



*Dad beero falanaaya.*

*Laylis :*

1) Sidee bay dadku ku ogaadeen in dhirtu ka abuuranto iniinyaha ?

2) Maxay waxbeeriddu kaga hawl yarayd xoola raacidda ?

3) Maxay ku kala duwanaayeen guryihii xoola dhaqatada iyo kuwii beeraleydu ?

4) Haddii aad damacdid inaad wax beeratid, meel sidee ah ayaad wax ka beeran lahayd ?

5) Sheeg qalabka dhulka lagu falaa sidii uu u soo kala horreeye ? Meesha aad joogtid sidee baa beeraha loo falaa ?





## CASHARKA KOW IYO LABAATANAAD

*Gaadiidkii Biyaha*

Dadku berigii hore markay damcaan in ay meel ka tagaan oo meel kale u guuraan way socon jireen oo ma ay aqoon wax kale oo ay raacaan. Waxa loo malaynayaa in gaadiidka uu ugu horreeyey ka biyuhu. Dadka webiyaasha agtooda deggani waxay arki jireen kalluun, shimbiro iyo xayawaan kale oo biyaha dhexdooda dabbaalanaya. Waxay kale oo ay arki jireen in biyaha webiyaaashu socdaan. Mar saddexaadka waxay arkeen dhir ama jirrido waaweyn oo biyaha dhex sabbaynaya.

Dadku markay arkeen waxyaalahaa fiiro dheer ayaa u kordhay. Markii hore waxay isku dayeen inay dabaashaan sida kalluunka iyo xayawaanka kale ee biyaha ku jira. Mar labaadkii dadkii waxay arkeen in haddii ay fuulaan jirridaha biyaha dhex sabbaynaya, aanay degayn. Waxay dadkii markaa ka faa'iidaysteen jirridihii oo ay u raaceen meelihii ay doonayeen. Markii xigtay jirridihii ayey dhexda ka qodeen oo ay halkii godka ahayd fariisteen. Markaa ka bacdi waxay sameeyeen seebab ay biyaha dib ugu riixaan si ay hore ugu socon karaan. Intaasi markii ay hirgashay, dabayshii ayey dadkii ka faa'iidaysteen oo waxay huuriyadii u sameeyeen shiraacyo markii hore hargo ahaa. Halkaa markii la gaaray dadkii inay lugeeyaan way ka nasteen. alaabtii ay iyagu qaadi jireenna waxay ku rarteen huuriyadii iyo doonyihii ay samaysteen.





*Horumarkii gaadiidka biyaha.*

*Laylis :*

1) Sidee bay dadku u ogaadeen in biyaha lagu dhoofi karo ?
2) Sidee baa dabbaasha loo bartay ?
3) Ka sheekay heerarkii gaadiidhu soo maray ?
4) Sidee bay dadku uga faa'iidaysteen dabaysha ?
5) Seebabku maxay u taraan huuriyada iyo doonyaha ?
6) Haddii seebabka biyaha hore loogu riixo doonidu ma horay u soconaysaa mise dib ?




## CASHARKA LABA IYO LABAATANAAD

*Gaadiidkii Berriga*

Xagga dhulka, dadku muddo dheer iyaga ayaa isu gaadiid ahaa. Meeshii ay u safrayaan waxay ku tegi jireen cagahooda, wixii alaab ay u baahan yihiinna waxay ku qaadan jireen madaxooda ama dhabarkooda, markii dadku ay ugaarsan jireen, ugaarta ay soo dilaan dhabarkooda ayey ku qaadan jireen. Marka ay soo dilaan ugaar waaweyn ama mid badanba, dhulka ayey jiidi jireen. Waxay dadkii ogaadeen in jiidistu ay xumaynayso hargaha iyo hilibkaba, markaa waxay soo goosteen laamihii dhirta oo inta ay ugaartii dusha ka saareen jiideen. Inkasta oo ay sidaasi ka hawl yarayd qaadistii, haddana qudheedu ma hawl yarayn.

Dadku berigii uu bartay rabbaayadda xoolaha, waxay ka faa'iidaysteen xoogga xayawaanka, sida geela iyo dibida oo ay marna fuli jireen, marna raran jireen. Boqolaal sannadood ka bacdi, waxa la soo saaray giraanta ama shaagga oo markii hore laga qoray loox. Inta laba shaag la sameeyey oo dhexda laga dalooliyey ayaa qori la isugu xiray. Labadii shaag korkooda waxa la saaray qoryo dhaadheer oo laga sarraysiiyey meel alaabta lagu qaado.
Halkaa waxa ka soo baxay gaariga dameeruhu jiidaan oo kale. Gaadiidkaa dadka markii hore iyaga ayaa jiidi jiray, laakiin markii danbe waxa lagu jiiday xoolihii xoogga lahaa sida dibida, awrta, iyo dameeraha. Intii aan la baran baabuurta iyo reelweeyada, sidaas ayey dadku berriga u dhoofi jireen, alaabtoodana u qaadan jireen.





*Horumarkii gaadiidka berriga*

*Laylis :*

1) Weeraha hoos ku qorani ma run baa mise waa been.

b. Dadku weligood xoolaha way raran jireen.

t. Dadku alaabta fudud waxay ku qaadi jireen madaxa iyo dhabarka, alaabta culusna way jiidi jireen.

j. Ugaadha marka la jiido dhulka, haraguna wuu xumaadaa, hilibkuna waxba ma noqdo.

x. Shaagga ama giraanta waxa la bartay intaan xoolaha la raran.

kh. Giraamihii ugu horreeyey waxa laga qoray loox.

2) Isku day inaad sheegtid waxyaalaha uu gaariga xoolulu jiidaan uga fiican yahay xoolaha la rarto.

3) Maxaa looga jeedaa dadku muddo dheer iyaga ayaa isu gaadiid ahaaa ?

4) Iyamaad u malaynaysaa inuu soo horreeyey : gaadiidka badda iyo ka berriga ? Waayo ?



## CASHARKA SADDEX IYO LABAATANAAD

### *Degmooyinkii Hore*

Sidii aynu casharradii hore ugu soo baranay dadka waxa ugu hor degay beeraleyda. Taa waxa keenay iyadoo qofka beer fashaa dhulka oo ku xumaada mooyee aanu waxa ugu hor degay beeraleyda. Taa waxa keenay iyada oo u baahnayn inuu guuro.
Haddaba beeraleydu xaggee bay degi jireen ?

Beeraleydu had iyo jeer waxay degaan dhulka webiyaasha leh iyo meeliha roobku ku badan yahay ay ciiduna fiican tahay. Berigii hore meeshii caynkaas oo kale ahba lama degi jirin. Dhulkaa waxa la degi jirey marka la arko inuu yahay meel nabadgelyo loo deggenaan karo, maxaa yeelay had iyo jeer waa laysku duuli jirey oo waa lays dhici jirey.

Dadku haddii uu meel degayo meeshaasi waa in ammaan lagu haystaa. Degmooyinkii ugu horreeyey ee la degey waxaa ka mid ahaa dhulkaa Masar oo uu webi weyni dhex maro. Webigaa oo la yiraahdo «NIIL» hareeraha waxaa ka xiga lama degaan aan cadowgu ka soo talaabi karin. Dhulkii loo yiqiin Mesobotaamiya waxa laga degay labada webi ee la yiraahdo Dajla iyo Furaat dhexdooda. Xagga woqooyiga labada webi waxa kaga wareegsan buuro dhaadheer. Labadaa webi oo aan cadowgu ka talaabi karin jirin iyo buurahaa dhaadheeri waxay ilaalin jireen nabadgelyada dalkaa.

Dalalka kale ee nabadgelyo aawadeed loo degay waxa ku jira, dhulka buuruhu ku wareegsan yihiin, iyo jasiiradaha ay baddu ku xeeran tahay. Degmooyinkii hore badankoodu caynkaas ayey ku bilaabmeen. Waqtigii hore meeli in kasta oo ay wanaagsan tahay lama degi jirin haddii aanay nabadgelyadu jirin. Sidaa awgeed nabadgelyada iyo dhulka degidiisu way isku xiran yihiin.

*Laylis :*

1) Goorma aycy beeraleydu ka guuri karaan meelaha ay deggan yihiin ?
2) Beeraha dhulka caynkee ah ayaa laga falan jirey ?
3) Dhulka la degayo maxaa nabadgelyadiisa loo fiirin jirey ?
4) Dhulka nababgelyada u fiicani waa ka sidee ah ?
5) Sheeg sida ay isugu xiran yihiin nabadgelyada iyo dhulka la degaa ?
6) Lama degaanka webiga Niil hareeraha kaga wareegsani muxuu Masar u tari jirey ?
7) Haddii aad waagii hore noolaan lahayd, ma waxaad degi lahayd buuro dhaadheer korkooda mise bannaan biyo badan ? Waayo ?